


Muxuu yahay Hal Bartame Magaalo (One Center City)

Hal Bartame Magaalo wuxuu isu keenayaa komiyuunatiyada, aragtiyo, iyo ka qeyb galayaal si loo abuuro qorshaha 20 sano ee ku jeeda sidaad ugu socon laheyn, isugu xiriiri laheyn, iyo u dareemi laheyn xaafadaha Bartamaha Magaalo ee Seattle

Gobolkayagu dhakhsi ayuu u korayaa, sida aannu u dhex mari laheynna iyaduna way is beddeleysaa. Si mustaqbalka loo qorsheeyo, Magaalada Seattle, Baska Degamada King County, (Tareenka fudud iyo baska la raaco) ee Sound Transit, iyo Is-kaashatada Bartamaha Magaalada way wada shaqeynayaan. Hal Bartame Magaalo waxey curineysaa qorshe shaqo oo dhow iyo mid 20 sano ah oo horumarinaya socodka, keenayana habab safar oo la isku halleyn karo iyo goobo guud oo waaweyn oo qof kasta helayo.



Bartame Magaalo Maanta

Bartame Magaalo waxa ka mida 10ka xaafadood ee ugu ciriiriga iyo korriimada badan Seattle.

Ku dhowaad

230,000

dadweyne ee isaga ayaa gudaha iyo dibadda Bartame Magaalo maalin kasta




70,000+

Deganyaal



250,000

shaqooyin




60+

degaan guryo iyo mashaariic ganacsi oo dhismo ku socdo


Mustaqbalka Bartame Magaalo

Seattle way koreysaa. 20ka sano ee soo soda, qoysaska iyo shaqooyinka Bartame Magaalo waxa la filayaa iney iyaguna koraan. Waxa intaa dheer raacista basasku oo iyaguna kordhaya iyo adeegyo tareenka fudud oo iyaguna jidka ku soo jira, kuwaasi oo keeni doona isku xirka degaanka Northgate (2021), Lynwood iyo Overlake (2023) iyo Federal Way iyo Bartamaha Redmond (2024)



25,000

oo qoysas dheeraad ah




55,000

oo shaqooyin dheeraad ah



Jadwalka Hal Bartame Magaalo



Sidee Baannu imika u Sahali Karnaa isu Socodka?

Mashaariicda guud iyo dhismayaasha, durba shaqo ayey ku jiraan waxey saameyn ku yeelan doonaan sida aannu isaga dhex socon karno sanadaha dhow. Haddii aannu imika waxba ka qorsheynin, waxanu fili karnaa dib u dhacyo, ciriiri, iyo saxmad

Hey'adaha lamaanayaasha ah waxey la shaqeynayaan bulshada si loo baadi goobo tabo waqti dhow ee caawin kara hab socodka Bartame Magaalo sida:

Howl galka Waddada Dusha Sare:

Waddooyinka Bartame Magaalo waxey isu dheelli tirayaan muhimmado badan. Istraatiijiyadda waxey kordhineysaa isu socodka iyadoo ku soo kordhineysa layman badan oo basas ah ama hagaajinta nalalka baabuurta hagta.

Dib u Dhiska Adeegga Basaska:

Basaska imika ku dhex socdaala bartamaha magaalada waxa lala xiriirin karaa tareenka fudud. Tani waxay caawineysaa dadka raaca gaadiidka safarka iyagoo ka faa'iideysanaya adeegyo basas oo la isku halleyn karo.

Hagaajinta Goobaha Lugeynta ee Dadku Wadaagaan:

Waddooyin dhinaceedyada iyo halka baska lagu sugo waa la hagaajin karaa si loogu sahlo lugeeyayaasha iney isaga dhex socdaan Bartame Magaalo iyo in la siiyo dadka raaca basaka dareen wanaagsan oo dheeraad ah.

Curinta Urur Baaskillo ee Bartame Magaalo:

Leyman baaskillo oo la dhowray ayaa lagu kordhi karaa qaar ka mida waddooyinka Bartame Magaalo si dadka loo siiyo hab wanaagsan oo isku xira iyaga iyo Bartame Magaalo.

Istraatiijiyadda Barnaamijyada iyo Maareynta:

Tababaha waxa ka mid ahaan kara yareynta waqtiga socdaalka, iyo maamulidda baarkinnada iyo waddooyin

dhinacyada, iyo barnaamijyo kale ee caawini kara socotada iyo dalxiisayaasha iney si tayo leh ugu tagaan halka ay doonayaan iyadoo la hubinayo in ganacsatada si dhaqsi ah u dejin karaan rarka alaabahooda.

Hey'adaha isbaheystay waxey la shaqeyn doonaan dadweynaha iyo hoggaamiyayaasha muhiimka ah si loo helo talooyin ku jeeda suurto gelnimo tabo lagu dhadhaqaaqi karo waqtiga dhow. Sannadka soo socda, Degmada King iyo Sound Transit waxey qaadi doonaan dadaalo ay kula xiriirayaan kuna jeeda isbeddellada ku iman kara adeegyada basaka. Isbeddellada ugu soo horreeya wuxuu fuli karaa xagaaga (fall) 2018.

Sidee bay Hal Bartame Magaalo u Muuqan Doontaa 20 Sano Gudaheeda?

Curinta tabo lagu horumarinayo isu socodka Bartame Magaalo waxa dheeri ku ah in la abuuro aragtida 20ka sano si loo hormariyo gaadiidka iyo goobaha guud ee dadku leeyihiin haddey ahaan laheyd socod, baaskiil, rarka, baabuurta, iyo basaska. Booqo websaadkeena si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan aragtida iyo sida aad nooga caawini karto qorshaha mustaqbalka

Muddo 20 sano, side baannu.....

- Isaga dhex socon doonnaa xaafadaha?
- Ugu xirmi karnaa qeybaha kale ee Magaalada iyo gobollada kale?
- u dareemi karnaa waddooyinkeena iyo meelaha guud?
- Aannu badeecadaha u gaarsiin karnaa guryaha iyo goobaha ganacsi
- u isticmaali karnaa teknoolijiyadda una dareemi karnaa magaaladeena?

Macluumaad intaa ka badan

In aad ogaato in badan oo ku saabsan Hal Bartame Magaalo iyo suurto-gelnimada istraatiijiyadda waqtiga dhow, fadlan booqo

OneCenterCity.org

Wadiiqo Helid

Haddii aad qabto su'aalo ama talo bixinno, ama haddaad u baahan tahay adeeg tarjumaan/ tarjumid ama tixgelin ku saabsan awood darro/ curyaansanaan, fadlan u iimeel garee info@OneCenterCity.org

info@OneCenterCity.org



 City of Seattle

 King County

 SOUNDTRANSIT

 Downtown Seattle Association